



Si xun u isticmaalka Yaradka (Dowry Abuse)

Qalalaasaha la xiriira Yaradka ama dhibitaanku waa nooc ka mid ah qalalaasaha qoyska iyo guriga.

Caadooyinka yaradku wuu ku kala duwanaan karaa dhaqamada iyo dalalkaba.

'Yaradku' waxaa loola jeedaa lacag, hanti ama hadiyad oo nooc ahaan uu ku wareejiyo qoyska naagtu ninku markuu guursanayo. Isticmaalka yaradka lafsadiisu ma aha wax xadgudub ah.

Ficilkii kasta ee xoog loo adeegsado, qalalaasaha ama dhibitaan la xiriirta bixinta ama qaadashada meherka wakhti kasta ka hor, inta lagu jiro ama guurka ka dib waa nooc ka mid ah waxyeelayn. Xadgudubyada la xiriira yaradka guud ahaan waxay ku lug leeyihiin sheegashooyin ah inaan la bixin yaradka iyo dalabaadyo Khasab ah oo naagta ama qoyskeeda balaarani ku doonayaan lacag dheeraad ah ama hadiyad.

Qalalaasaha qoyska iyo guriga waa dembiyo ka soo horjeeda sharciga Australia. Qofka gala dembiyadaan xabsi buu geli karaa, haddii ay yihiin nin ama naag.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo tallo bixin qarsoon oo bilaasha wac **1800RESPECT 1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

Dawlada Australia uma dulqaadaneyso qalalaasaha yaradka la xiriira ama dhibka xaalad kasta.

The Australian Government waxay u qaadanaysaa arinta qalalaasaha qoyska, oo uu ku jiro qalalaasahala xiriira meherka iyo dhibida, si aad u daran. Dhammaan australiyaanku waxay xaq u leeyihiin inay noolaadaan qalalaaso yaraan, cabsi ama xoog ku dirqiyid, iyadoon loo eegaynin diintooda, waxqabadka dhaqankooda iyo waxay rumeysan yihiin.

Inta lagu jiro qalalaasaha la xiriira meherka iyo dhibka waxaa ku jira dabecada ama hanjabaada loola qasdayo in lagu kontoroolo sayga/da ama qoyskooda iyagoo dhalinaya cabsi ama ammaankooda u hanjabaya.

Haddii aad fiisa ku joogtid weli waxaa heli kartaa caawimaad.

Sayga/sayda, xubnaha qoyska ama dadka kale ee bulshada dhexdeeda ah waxyeelo uma geysan karaan xaalada fiisahaaga.

Haddii aad heysato fiisaha lammaanaha ee ku meelgaarkaah (subclass 309 ama 820) ama Fiisaha Guurka la Filayo (subclass 300) uuna kugu sameeyey qalalaaso yaradka la xiriira, waxaad sida ku qoran sharciyada Australia xaq u leedahay inaad sii wado codsiga fiisaha lammaanaha ee joogtada ah (subclass 100 ama 801).

Yaradka looma isticmaali karo in qof lagu khasbo guur.

Haddii loo isticmaalay yaradka si qof loogu khasbo guur isagoon bixin ka raali ahaanshihiisa oo buuxa xorna ah, tani waxaa laga yaabaa inay noqoto guur khasab ah.

Australia gudaheeda, qofkastaa wuxuu xor u yahay inuu doorto haddii, qofka iyo goorta uu rabo inuu guursado. Sharciga Australia ayey sidoo kale ka soo horjeedaa in la abaabulo guur khasab ah, iyo inaad xubin ka noqoto guur khasab ah haddii aadan ahayn dhibanaha. Hanjabo ama la khiyaameeyo cidna inuu/inay guursato. Tani waxay khuseysaa guurka sharciga ah, kuwa dhaqanka iyo kuwa diiniga ah.

Waxaa jira adeegyo xasaasiya Australia dhexdeeda oo caawimaad bixin kara.

1800RESPECT waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah **www.1800RESPECT.org.au**.

My Blue Sky waa website ka qaranka Australia iyo khadka wicitaanka ee loo gaar yeelay ka hortaga guurka khasabka ah, macluumaadka, gudbinada iyo talada sharciga bilaashkaah.

Ka wac **(02) 9514 8115**, fariin ugu dir **0481 070 844**, limeyl **help@mybluesky.org.au**, ama ka gal website ka **My Blue Sky** ah **www.mybluesky.org.au**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qalalaasaha qoyska iyo fiisooyinka, iyo guurka khasabka ah iyo ka ganacsiga bani'aadamka wuxuu ku yaal website ka **Department of Home Affairs** ee **www.homeaffairs.gov.au** oo raadi "guurka khasabka ah" ("forced marriage").

Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wecitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.